

## Baasaboorka [främlingspass]

Haddii aad uu baahantahay baasaboorka, oona ku suurtagaleeyn in aad hesho mid, wuxuu Migrationsverket ku siin karaa arimo qaarkood baasaboorka loo yaqaanno främlingspass. Siyaabaha Migrationsverket usan baasaboorka ku bixin waxaa kamid ah, haddii codsadehu usan baasaboorka dalkiisa hooyo ka heli karin taasoo u sabab ah dhibaato, waqti dheerid ama qaalinimo. Haddii aad sharciga daganaanshada uu heshay sabab la xariirto difaacnimo markaas waa heli kartaa baasaboorka främlingspass-ka. Baasaboorka främlingspass dal kasta ayaa lagu geli kara. Inta laga reebi karo waxaa waaye dalkaada hooyo maadaamo aad sharciga daganaanshada uu heshay baahi difaacnimo. Markaasi waad uu safri kartaa dhamaan dalal kale oo aan dalaakada hooyo eheen. Laakin dalka aad uu safreeysid waxeey kuugu xujeey karaan fiiso loogu tala galay muwaadiniinta dalalka kale.

Baasaboorka främlingspass wuxuu waafaqsan yahay shuruuda baasaboorka ee Midowga Yurub. Waxaa baasaboorka ku dhexjira qalab ku keydsan warbixin-shaqsiyeedka, faraha iyo masawirka qofka baasaboorka iska leh. Dadyoowga da'dooda ka horeeyso 18 sano caadi ahaan waa in waalidiintooda ama xilhaayehooda ay ka haystaan oggolaanshada baasaboorka främlingspass.

### Codsashada baasaboorka främlingspass

Foom u gaar ah ayaa baasaboorka främlingspass lagu codsada. Foomka waa in laf ahaantaada aad geysa xafiis kamid ah xafiisyada Migrationsverket ee ah kuwa loo yaqaanno [tillståndsenheter]. Booqashada horraanteeda uma baahnid inaad ballan qabsato. Foomka codsigaaga waa inaad ku soo lifaaqda:

- Baasaboorkaagi hore – waa haddii beri hore lagu siiyay.
- Wixii dokumenti ah ee aad ku caddayn karto aqoonsigaaga.
- Caddaynta ruqsada degenaanshada joogtada ah [permanent uppehållstillstånd] waa haddii sharciga lagu siiyay.
- Carruurta da'dooda 18 sano ka hosseyo waa in xilhaayeha/waalidka oggolaansho ay ka haystaan.

Markii foomka codsigaaga aad keento Migrationsverket ayaa ku masawirayo oona faraha ka qaadayo. Ha iloowin inaad foomka codsiga saxiixdo!

### Qiimaha

Qiimaha codsashada baasaboorka främlingspass imminka waa 750 karoon, waa inaad bixisa markii baasaboorka aad codsanayso. Haddii lacagta aadan bixin waxba laga ma qaban doono codsigaaga.

Dadyoowga dalka Iswiidan dowlada keentay, sida hadba ku xusan heshiiska qaxootida, lagama qaado kharashka ee koobaad.

### Xilliga sugitaanka

Hab dhaqsi ah ayaan codsigaaga wax ugu qaban karna haddii codsigaaga usan qabyo ahayn, oo aad ku soo lifaaqdo dhammaan warqadaha laga codsaday.

Baasaboorka främlingspass waxaa lagu sameeyaa hal ilaa laba toddobaad, tiriskaas oo laga soo bilaabo maalinta Migrationsverket u go'aamiyo in baasaboorka lagu siiyo.

Ogeysiis! Waa in adiga laf ahaantaada baasaboorka främlingspass aad soo doonata.

Haddii aad ka yartahay 18 sano waxaa soo qaado karo baasaboorkaada qofka ka masu' uul ah adigoona soo raacin.

### **Xilliga baasaboorka la adeegsan karo**

Baasaboorka främlingspass waxaa lagu isticmaali kara shan sannadood, lama cusbonisiin karo.

Haddii baasaboorka kale aadan lahayn markii lagu cusbonisiinaayo ruqsada degaanshaha, waa inaad mar labaad baasaboorka främlingspass codsata.

### **Rafcaan**

Go'aanka Migrationsverket ku saabsan baasaboorka främlingspass rafcaan lagama qaadan karo .

### **Foomamka**

Foomamka waxaad ka soo dalacsan karta ama ka dalban kartaa goobta Internetka, [www.migrationsverket.se](http://www.migrationsverket.se). Waxaad kaloo u soo qori kartaa e-mail: [distributionen@migrationsverket.se](mailto:distributionen@migrationsverket.se) ama warqad uu soo qor Migrationsverket, Distributionen, 601 70 Norrköping.

### **Warbixin dheeraad**

Warbixin dheeraad waxaad ka heleysa goobta Internetka Migrationsverket [www.migrationsverket.se](http://www.migrationsverket.se) ama wac Warfaafinta 0771-235 235.

*Ogeysiis! Markii laga arrinsanaayo codsiga baasaboorka främlingspass, wuxuu Migrationsverket warbixin kugu saabsan ka raadsanaya diiwanka dambiileyaasha ee xoogga booliska.*